

Macluumaad cusub oo ku saabsan siyaasada Maamulkii Hore ee joogsiga Gargaarada Dowladdeed

Maamulka Biden wuxuu go'aansaday in uu ka noqdo difaaciidii sharciga ahayd ee siyaasada maamulkii hore ee xeerka gargaarada dowladdeed 'public charge'. Halkan waxaa ku qoran macluumaad ka socda Protecting Immigrant Families. Fahamka ah in macnaha siyaasadeed iyo siyaasad dejintu uu si dhakhso leh isu beddeli doono bilaha soo socda, macluumaadkani waxaa loogu talagalay in uu gacan ka geysto jawaabo daacad ah, wax ku ool ah oo la siiyo qoysaska walaaca qaba.

- Maamulka Biden ayaa qaaday tallaabo lagu joojinayo siyaasadii maamulkii hore ee xeerka gargaarada dowladdeed 'public charge'
- Iyada oo ay hadda maxkamadaha federaalku diideen rafcaanada dowladda, siyaasadii xeerka gargaarada dowladdeed 'public charge' ee hore ma aha mid hadda ka dib dhaqan gal ah.
- Barnaamijka muddada dheer soo jiray ee 1999 "field guidance" ayaa si dhakhso leh u khuseyn doona, kaasi oo muhaajiriinta iyo qoysaskooda ka dhigaya in ay isticmaalaan, caafimaadka, nafaqada iyo barnaamijyada guryaha ee ay u qalmaan.
- Waa mid ammaan ah oo wanaagsan in la arko dhakhtar haddii aad u baahan tahay daryeel, ama ka walwalsan tahay in ay dhici karto in aad jiran tahay.
- Xeerka daraasadda lagu sameynayo gargaarada dowladdeed 'public charge' wuxuu kaliya khuseeyaa barnaamijyada qaarkood iyo muhaajiriinta qaarkood.
 - Marnaba ma khuseeyo muwaadiniinta Maraykanka, oo ay ku jiraan carruurta ay dhaleen muhaajiriintu.
 - Ma khuseeyo sidoo kale dadka haysta kaarka degaanshaha rasmiga ah "green card", fiisayaasha magan gelyo doonka, qoxootiga, ama ka badbaadaha rabshada qoyska.
 - Xubnaha ka tirsan qoyska ee isticmaala barnaamijyada dadweynaha saameyn kuma yeelan karo codsiyadooda muhaajirnimo ee mustaqbalka.
 - Baaritaanka, daaweynta, iyo adeegyada dhanka ka hortagga ee loogu talagalay COVID-19— oo ay ku jiraan tallaalada — qayb kama aha xeerka gargaarada dowladdeed 'public charge'. Lacagta gargaarka ee cudurka baahsan (jeegaga dhiirigelinta ah 'stimulus checks') sidoo kale qayb kama aha xeerka gargaarada dowladdeed 'public charge'.
 - Iisticmaalka caafimaadka, nafaqada, iyo barnaamijyada guryaha looma tixgelin karo in ay yihiin gargaarada dowladdeed 'public charge'.

Fadlan akhri [bogga Protecting Immigrant Families](#) wixii macluumaad dheeraad ah, ama waxaad la xiriiri kartaa [Antonio Torres](#), MPH, Xafiiska Adeegyada Sinnaanta iyo Dhaqamada Kala Duwan, Maamulaha Hawlgelinta Bulshada.